

Aragtida

Mustaqbalka Gaadiidka ee Seattle



Seattle
Department of
Transportation

QORSHAHA GAADIIDKA SEATTLE

MARKA LA EEGO | Ogosto 2023

Qorshaha Gaadiidka Seattle (STP) waa qorshe 20 sano ah ee mustaqbalka gaadiidka ee Seattle. Waxay gacan ka geysan doontaa hagidda sida aan u casriyeyno oo aan u ilaalino nidaamkayaga gaadiidka si aan si joogto ah dadka ugu xirno fursadaha, dabeecadda, iyo midba midka kale. Waa qorshe lagu bixinayo dookhyo socdaal oo la isku halayn karo oo loogu talagalay dadka iyo badeecadaha iyo in dib loo qiyaaso waddooyinka inay yihiin meelo soo dhaweyn leh oo loogu talagalay dadka, dhaqanka, ganacsiga, madadaalada iyo isu imaatinka. Waa fursad la iskugu timaado-sida Seattle oo Hal ah.

The **STP At a Glance** wuxuu iftiiminayaa qaybaha ugu muhiimsan ee qorshaha. Macluumaad dheeraad ah ayaa laga heli karaa dukumeentiga STP oo buuxa (fiiri koodka la sawiran karo ee ku yaal gadaasha buugyarahan).

ARAGTIDA (HIIGSIGA)

Seattle waa magaalo loo siman yahay, firfircooni leh, oo kala duwan halkaasoo ku-soo-wareegeedu yahay ammaan, cadaalad, iyo mid iswadi kara. Dhammaan dadka iyo ganacsiyadu waxay heli karaan baahidooda maalinlaha ah waxayna dareemi karaan inay ku xidhan yihiin bulshadooda.

Natiijadii wadahadal sanadoo dhan lala yeeshay dadka Seattle oo dhan.

YOOLALKA

Waxaa qaabeeyay dadka Seattle, hadafyadani waxay naga caawiyaan inaan go'aan ka gaarno mustaqbalka gaadiidkeena.



Badbaadada

Mudnaanta sii badbaadada socotada Seattle, oo aan lahayn dhaawac halis ah ama shilal dilaa ah



Sinnaanta

La-abuuro bulshada oo hirgeli dhaqamada soo celinta si wax looga qabto sinnaan la'aanta gaadiidka la xiriirta



Is-wadi-kara

Ka jawaab isbedelka cimilada iyada oo loo marayo hal-abuurnimo iyo aragtiyada caddaaladda cimilada



Dhaqdhaqaaqa

Bixi doorashooyin la isku halayn karo oo la awoodi karo oo dadka iyo badeecadaha u suurtagelinaya inay gaaraan halka ay u baahan yihiin.



Lagu-noolaan-karo

Dib u qiyaas waddooyinka magaalada sidii meelo soo-dhaweyn leh oo lagu raago laguna ciyaaro



Dayactirka & Casriyeynta

Hagaajinta kaabayaasha gaadiidka magaalada una diyaari mustaqbalka

DHAQDHAQAAQYADA MUHIIMKAA

Dhaqdhaqaaqyada Muhiimka ah waxay naga caawinayaan inaan gaarno Hiigsiga iyo Yoolalka STP. Si Seattle ay u sameeyso isbeddello wanaagsan si dhaqso leh, waxaan u baahanahay inaan isticmaalno habab la yaqaan oo shaqeeya oo aan isku dayno habab cusub oo u dhigma waxa bulshooyinkeenu rabaan.

Badbaadada

- Yaree xawaaraha gaariga si loo kordhiyo badbaadada
- Isku-dubarid maalgelinta badbaadada meelaha shilalka ugu badan ka dhacaan
- Ka dhig dhammaan safarrada badbaado leh, laga bilaabo bixista ilaa meesha loo socdo
- Bixi waddooyin ammaan ah oo loo maro dugsiyada, beeraha raaxada, gaadiidka, meelaha ay bulshadu isugu timaado, iyo meelaha kale ee la wadaago

Is-wadi-kara

- Hagaajinta tayada hawada xaafadaha iyo natiijooyinka caafimaadka adiga oo horumarinaya doorashooyin safar nadiif ah oo waara
- Waddooyinka magaalada oo cagaaran iyada oo loo marayo qaabaynta dhirta iyo geedaha dariiqyada si si wanaagsan wax looga qabto cimilada isbeddeleya
- Kobci firfircoonida xaafadda iyo horumarinta caafimaadka bulshada
- Taageer u-wareejinta shidaalka fosil oo loo gudbo baabuur koronto ku shaqeysa ee safarada shaqsigu, ganacsiga, iyo wax-qaadida
- Hormari xeeladaha maaraynta dhaqdhaqaaqa si aad u dhiirigeliso socodka, baaskiilka, iyo safarada gaadiidka

Lagu-noolaan-karo

- Si geesinnimo leh kala-beddel meelaha wadada si dadka mudnaan loo siiyo iyadoo la ilaalinayo gelitaanka badeecadaha iyo gurmada degdegga ah
- Ka dhig xarumaha bulshada iyo dhaqdhaqaaqa meelo soo dhaweyn leh
- Wada-abuur oo sare u qaad goobaha caamka ah ee lagu ciyaaro laguna kulmo si loo horumariyo caafimaadka bulshada
- Hawl-geli oo ilaali goobaha caamka ah si loo abuuro dhaqan soo dhawayn leh da' kasta ku haboon

KU-HAWLANAANTA MILICSI

Intii lagu jiray ka-qaybgalka STP, waxaan gaadhnay kumanaan qof-si loo dhiso wacyi-gelin, loo maqlo talo-bixin, iyo in la-abuuro hiigsiga mustaqbalka ee gaadiidka Seattle.

Sinnaanta

- Xenter the voice bulshooyinka midabka leh iyo kooxaha aan matalayn ee qorshaynta iyo habraacyada go'aan qaadashada
- Wax ka qabashada sinnaan la'aanta nidaamka gaadiidka iyadoo mudnaanta la siinayo maalgelinta bulshooyinka la-saameeyay
- Ka saar kharashka oo noqon kara caqabad si qof kastaa ugu fududaato safarrada ay u baahan yihiin inay galaan.

Dhaqdhaqaaqa

- Samee xiriir socdaal oo aan kala go'lahayn
- Samee doorashooyin safar oo lugta, baaskiil wadida, iyo rogrogidda fududeyd iyo mid xiiso leh ka dhigaya
- Abuur helitaan heer caalami ah oo gaadiidka ah oo ka dhig adeegga mid joogto ah oo la isku halayn karo
- Sara u qaad dhaqaalaha adiga oo taageeraya dhaqdhaqaaqa xamuulka iyo kobaca wax-qaadista
- Maaree meesha laga leexinayo si loo matalo yoolalka iyo mudnaanta magaalada

Dayactirka & Casriyeynta

- U beddel waddooyinka magaalada badbaado iyo doorashooyin safar oo waara iyada oo loo marayo wakhtiga ugu haboon ee dayactirka hantida iyo beddelka
- Yaree kala duwanaanshaha xaafadaha ee tayada waddooyinka, laamiyada, meelaha dadweynaha, iyo buundooyinka
- Jidadka magaalada oo u diyaarsan doorashooyin cusub oo socdaal ah iyo isbeddellada iyo teknoolojiyada soo baxaya

76,000+
Dhibcaha xogta shakhsiga ah ee lagu ururiyay ka-qaybgalka STP

7,000+
Dadku waxay ku hawlanaayeen munaasabada wacyigelinta ee STP

Waxaan ku waydiinay inaad nala samayso STP-waana tan waxaan maqalnay.

"Waqtigii wax-qabadka mar horaa la gaaray"

"[Transportation] waa inuu ahaadaa mid qof walba awoodi karo, taas oo ah in qof kastaa awood u yeesho inuu si raqiis ah u isticmaalo gaadiidka, lugeynta, ama baaskiilka."

"Hagaaji shabakadda gaadiidkeena dadweynaha iyo, ka sii muhiimsane, ka hormarinta kuwa aan baabuurta ahayn ee bannaanka waddooyinka. Samee leyman baaskiil iyo bas oo badan ee jidadkeena waaweyn, ka saara meelaha socodka guud iyo gaari-dhigashada wadada marka loo baahdo in sidaas la sameeyo. Waa inay ahaato mid badbaado leh oo ku habboon in la isticmaalo adeegyadan

"Fiiro gaar ah u yeelo dadka ugu badan ee doonaya si nabadgelyo leh, sinnaan ah, siyaabo badan oo u adkaysiga cimilada leh si ay ugu wareegaan Seattle."

"Fududeynta gaadiidka xamuulka iyo ganacsiga, gaar ahaan waqooyiga kanaalka markabka. Leh waddooyin kale oo taraafikada ku filan haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah, sida dhulgariir iyo/ama duufaan"

"Dayac-tirku waa shaqada aan quruxda badnayn laakiin waa shaqada muhiimka ah ee ka dhigaysa magaaladeena mid xiiso leh."

"Bulshooyinka kala duwan ee dadka, kala duwan, iyo bulshooyinka lagu noolaan karo waxay bixiyaan sinnaan asal ahaanba. Guryo badan, shaqo, madadaalo, iyo fursado ganacsi dhammaan dadka oo dhan!"

"Waxaan u baahanahay gaadiid degdeg ah, badbaado leh, oo la awoodi karo oo aan u baahnayn in ka badan dhowr baloog oo loo socdo xarun."

"Marka la sameeyo qorshe wanaagsan iyo ka-qaybgal, waa in la helo nidaam degdeg ah oo lagu beddelo."

"Sinnaanta waa inay noqotaa udub-hexaadka hindise kasta. Hagaajinta fursadaha gaadiidka/badbaadada xaafadaha leh gaadiid/nabadgelyo ku filan... waa in ay timaadaa ka dib markii ay horumariyaan meelaha taariikh ahaan la iska indho tiray."

Sidaan ayaan u isticmaalnay talo-bixintaada.



Macluumaadka ku saabsan sida aan u sameyn doono wacyigelinta mustaqbalka
Ka-qeybgelinta/ka-shaqeynta



Hagaha halka iyo waxa aan maalgelinno marka hore
Mudnaan-siinta



Istaraatiijiyada sida aan u bixinno qarashkiisa oo aan u hirgelino qorshaha
Istaraatiijiyada Hirgelinta



La-socda horumarkaas raadraaca
Cabbirrada Hawlfulinta



Jihada siyaasadda ee ka tarjumaysa qiyamka magaalada
Sharuucda



Khariidado ina tusinaya halka aan hagaajino
Shabakadaha Maalgashiga



Mashaariicda iyo barnaamijiyada lagu hagaajinayo nidaamka gaadiidka
Baahiyaha Barnaamijka iyo Mashruuca

QODOBBADA STP

Qaybta I ee STP, waxaanu kaga hadlaynaa sida qaybaha kala duwan ee nidaamka gaadiidku u wada shaqeeyaan si loo gaadho yoolalkayaga. Qaybta II waxay leedahay cutub gaar ah oo loogu talagalay habab gaar ah si loo wareego iyo siyaabaha muhiimka ah ee aan u isticmaalno jidadkeena. Qodobbadani waxay muujinayaan qorshayaashayada waaweyn ee lagu taageerayo yoolalka ugu muhiimsan iyo Dhaqdhaqaaqyada Muhiimka ah ee qorshaha. Qodobbada qaar ka mid ah ayaa sidoo kale leh maab muujinaya halka aan marka hore diirada saari doono.

STP waxa ku jira sideed Qodob:

- Lugeeye
- Baaskiil iyo Dhaqdhaqaaq elektroonik ah
- Gaadiid
- Xamuulka iyo Alaabooyinka Magaalada
- Jidadka Dadka iyo goobaha dadweynaha
- Maareynta Qarka-wadada
- Dhaqdhaqaaq cusub oo soo baxaya
- Gaadhi

DHAQANGELINTA QORSHAYAASHA

Dadka Seattle waxay noo sheegeen inay rabaan isbedel weyn oo degdeg ah oo ku saabsan sida ay ugu socdaalayaan magaalada. Waxaan rabnaa fikradahaaga ku saabsan sida qorshahan Qabyo-qoraalka ah uu ula kulmo hiigsiga STP, sida aan u go'aamin doono waxa la qabanayo marka hore, iyo sida aan lacag ku heli doonno. Sidaan, waxaan kugu siin karnaa isbeddelada aad rabto.

SABABTA AAN UGU BAAHANAHAY QORSHAHAN

Marka aan qaadno dhibaatooyinka muhiimka ah maanta, waxaan sidoo kale u baahanahay inaan ka fikirno sida nidaamka gaadiidkeena uu isu bedeli doono waqti ka dib si aan u daboolno baahideena mustaqbalka.

Waxaan u baahanahay qorshe naga caawinaya inaan samayno doorashooyin casri ah oo aan ku maalgelinno xalalka ku habboon qiyamka magaaladayada iyo yoolalka mustaqbalka.

Qorshahani waxa uu horu marinayaa 7-daan natiijo:

- Dadka ilaali
- Maalgashiga sinnaanta
- Kobci gaadiidka cagaaran
- isku-xir shaqooyinka iyo guryaha
- Balaadhi gelida la awoodi karo
- Ka tarjum ahmiyadaha bulshada
- Ku beddel oo ku cusboonee isbeddellada soo baxaya

Waad ku mahadsan tahay ka qaybqaadashada horumarinta Qorshaha Gaadiidka Seattle! Waxaan rajeyneynaa inaan sii wadno inaan adiga iyo deriskaaga la shaqeeyno si aan u abuurno nidaam gaadiid oo buuxinaya baahiyaha wadajirka ah.

Ma u baahan tahay macluumaad dheeraad ah, ma qabtaa su'aalo, walaacyo, ama faallooyin?

limeel noogu soo dir: STP@Seattle.gov

Soo wac khadkeena fariimaha codka: **206-257-2114**

Booqo Xarunta Ka-qaybgalka STP: **Isticmaal kood la sawiran karo**

